

TALLAALKA

Finland waxaa jira barnaamijidka tallaalka bulshada. Hadafka laga leeyahayna waa in tallaaladaas ay sida ugu macquulsan ooga badbaadiyaan cudurada tallaalkaas loogu talagalay. Tallaaladaas awgood ayaa Finland cudurada qaarkood ay aad oogu yaryihiin amaba ay ka dhammaadeen.

Daryeelka caafimaadka iskuulada ayaa siinaya tallaalada teetanada, qaamaqashiirka, xiiq-dheerta dhammaan ardayda 14-15 jirka ah, gabdhaha da`doodu tahay 11-15 jir waxaa laga tallaalayaa cudurka ku dhaca minka, tallaalka teetanada iyo qaamaqashiirka waa in 10kii sanoba mar la xoojiyaa.

Dadka aan horay loo tallaalin ama aan garanaynin in la tallaalay iyo in kale, waxaa si shaqsiyan ah loogu sameynayaa barnaamij tallaal. Warbixin dheeraad ah waxaa ka heleysaa iskoolka iyo kalkaalisada daryeelka caafimaadka ee iskoolka. Tallaalka ma aha qasab, waana lacag la`aan.



Sanni Weckman / TAMK

Kahortaga daryeelka caafimaadka iskoolka iyo daryeelka caafimaadka ardayda



Elinkeino-, liikenne- ja
ympäristökeskus



Qoraalka: Tuija Vuolle/MAKO-mashruuca
Sawirka: Sanni Weckman/TAMK
Waxaana tarjumay xafiiska turjubaanada ee Pirkanmaa

Barnaamijka caawimidda ajaanibta ee laqabsashada waddanka daryeelka caafimaadka carruurta iyo dhalinyarada -mashruuca (MAKO)

KAHORTAGA DARYEELKA CAAFIMAADKA ISKOOOLKA IYO DARYEELKA CAAFIMAADKA ARDAYDA

Kahortaga daryeelka caafimaadka u macnahiisu waa in si da oogu macquulsan ooguna dhaqsaha badan loo ogaada loogana hortagaa cudurada kala duwan iyo wax yaalaha caafimaadka dhibta u keeni kara. Kahortagaas wax qabadkiisu waa in ardayda/ardayga uu helaa caawifaad iyo taakuleen ah koritaankiisa iyo kobociisa, iyo waliba in lagu hago hanka nolasha wa-naagsan.

Iskoolka iyo qaybta daryeelka caafimaadka ardayda waxaa si joogta ah loo sameeyaa baaritaano caafimaad. Kalkaalisada ayaa ardayda/ardayga u sheegta waqtiga uu ardaygu lee yahay baaritaanka caafimaadka. Baaritaankaas waxaa lagu waaniyaa in uu ku noolaado nonol wanaagsan, iskana ilaa-liyo waxyaalaha qaratta u keenaya caafimaadkiisa. Ardayda/ardayga waxaa lagu hгаа cudurka ama jiradiisa daryeelka uu u baahan yahay.

Iskoolka iyo qaybta daryeelka caafimaadka ardayda waxaad tagi kartaa adoon waqti qabsan iskool walba xilliga qaabilaada ee loogu talagalay, qaabilaadana waa lacag la`aan. Daryeelka caafimaadka iskoolka ma ah xarun dhaqtareed. Daryeelka caafimaadka iskoola qaabilaadda jirooyinka qofka gaaray 18 jir qaabilaadiisa waa lacag.

DARYEELKA CAAFIMAADKA ISKOOOLKA BAARITAANKA CAAFIMAADKA

Fasalada 1.,5. iyo 8. baaritaanka guud

Foomka hore ee la buuxbuuxinayo waxa uu caawinayaa kalkaalisada si ay u samayso baaritaan. Foomkaas buuxintuusu waa wada hadal lagula yeelanayo, marka la ogaanayo bahida caafimaad ee ardayga, habka caafimaadkiisa, waxbarashadiisa iyo caafimaadka ardayga iyo qoyskooda.

Baaritaankaas marka la sameenayo waxaa loo yeerayaa waalidka ama mas`uulka ardayga.

Baaritaankaas waxaa labaarayaa awooda caafimaadka ardayga, sida culeyka, dhererka, dhaq-dhaqaaqa xubnaha, aragtida, iyo maqalka. Sidoo kale dhaqtarku waxa uu samaynayaa baaritaan ardayda fasalka 8aad, waxaana laqayaasayaa siiwadidda waxbarashada sid iskoolada xirfadaha lagu barto. Baaritaankaas waxaa lagala hadlayaa arimaha xiriirka dadka, arimaha dumarka iyo ragga, muqaadaraadka, iyo arimaha maskixiyanka.

BAARITAANKA CAAFIMAADKA EE FASALADA KALE

Fasalada 2., 3., 4., 6., 7. iyo 9 ardayda fasaladaas waxaaloogu yeerayaa baaritaan caafimaad. Baaritaankaas waxaa lala soconayaa koritaanka iyo koboca ardayga. habka caafimaadkiisa iyo habka nolaosha wanaagsan. Haddii loobaahdana waxaa si joogta ah oola kulmaya kalkaalisada iyo/ama dhaqtarka.

DARYEELKA CAAFIMAADKA ARDAYGA BAARITAANKA CAAFIMAADKA

Ardayda dhigata dugsiyada sare ama dugsiyada xirfadaha inta badan baaritaanka caafimaadka waxaa ardaygu uu la kulmayaa kalkaalisada caafimaadka waa haddii waxbarashadu ay ka badan tahay sanad. Haddii loo baahdo ardayga waxaa lagu hagayaa baaritaanka dhaqtarka. Sanad dugsiyeedka oogu horeeyo ardayda dhigatada kulliyadaha tacliinta sare waxa ay buub-buuxinayaan foom, foomkaas kadib ayaa ardayga loogu yeerayaa baaritaanka caafimaadka.

Foomkaas hore buuxintuusu waa wada hadal lagula yeelanayo, marka la ogaanayo bahida caafimaad ee ardayga, habka caafimaadkiisa, iyo arima laxiriira doorashada xirfadaha. Baaritaanka waxaa la baarayaa awooda caafimaad ee ardayga. Waxaana lasiinaya latalin haddii loo baahdo, sida nafaqooyinka, isboortiga, kahortaga uurka, tallaalka, iyo daryeelka maskixiyanka.